



CHILDREN'S  
AID SOCIETY  
of TORONTO

LA SOCIÉTÉ  
DE L'AIDE  
à  
L'ENFANCE  
DE TORONTO



# Edbinta Hagaagsan

Maxaa Ammaan ah? Maxaa la Aqbali Karaa?  
Maxaan La aqbali Karin? Maxaa Shaqeyn Kara?

## Sidee Ayey u Eg Tahay Ababinta Hagaasan ee Waalidnimo?

Ababinta hagaagsan ee waalidnimo waxay xoojinaysaa qiimaha dadnimo ee aad rabto in ilmahaagu bartaan, adiga oo aan isticmaaleyn ciqaab jir-dil ah. Waalidiinta waxay isticmaali karaan edbin hagaasan, taas oo ku lug leedahay qeexidda hab dhaqan la aqbali karo iyo waxyaabaha macquulka ee ay muteysan karaan carruurta haddii ay jebiyaan sharciyada. Edbintu waxay carruurta siineysaa qaab-dhismeedka ay u baahan yihiin inay iska adkaadaan ayna mas'uul ka noqdaan dhaankooda.

## Siin Qaab-dhismeed

Waalidiintu waxay u baahan yihiin si ay u bixiyaan qaab-dhismeedka si ay u gutaan ababin waalidnimo oo wax ku ool ah. Shaqaalaha adeegga Qoyska ee Children's Aid Society of Toronto, waa qayb ka mid ah kooxa caawiyo qoysaska si ay taas u sameeyaan. Dhibaatooyin ayaa dhaca marka ayna jirin qaab-dhismeedka cad, ama nooca edbintu isbedbedalayso carruurtuna waxay dareemayaan nabadgelyo iyo isku kalsoonaan marka ay ogyihiin waxa ay ka filan karaan waalidkooda. Haddii waalidiinta go'aankoodu yahay mid aan isbedbedelayn, carruurta waxay fahmayaan in maya ay tahay maya-ee ayna ahayn waa suurigal.

Waxa kaloo ee aan ka caawinaa waalidiinta maaraynta dabeecaddooda halkii aan dareenkooda ka caawin lahayn. Waalidiintu waxay u baahan si ay u awoodaan inay dejiyaan dareenkooda isku buuqa ama carada inay u abbaaraan wixii markii horeba sababay dareemadaas.

## Noqo Macquul

Inkastoo qaab-dhismeedka iyo waxa sida joogta ah loo sameeyo ay yihiin, waxa kale ee muhiim ah dhelirtirnaanta qofka. Waalidiintu waa in aanay noqon kuwo aad u qalafsan ama

aad u dabacsan. Haddii ay tahay maalintii dhalashada ilmahaaga hase ahaatee ay ciqaab ku jirtay, waa inaad tixgelisaa ka dhaafidda ciqaabta maalintaas, laakiin ay maalinta ku xigta ciqaabtu halkeedii ka bilaabato. Sida waxyaabaha kale ee la xiriira ababinta, waa in aad firisaa korriisimaha ilmahaaga, si aad u aragtid inay qaban dhibaato la xiriirta dareenkooda ama habka waxbarashadooda taas oo caddeyneysa sababta keentay dabecad qalafsanaanta.

Waxyaabaha ugu fudud sida hadalka Wanaagsan wuxu jid dheer u furaya sugidda xududaha. Muhimad ha siin waxa xun ah. Waalidiintu waa inay dejiyaan bartilmaameed, siiyaan ra'yi-celin wanaagsan ay had iyo jeerna dhaqanka xun u jeheeyaan dhanka Wanaagsan. Waxaad Isku daydaa inaad tiraahdo haa, halkii aad jawaab walbaba ku bilaabi lahayd maya. Haddii ilmahaagu doonayo jalaato cashada ka hor, dheh "haa", jalaato waad heli cashada ka dib.

## Maxaa la aqbali karaa?

### Maxay tahay edbintu?

### Maxay tahay ciqaabtu?

Edbinta hagaasan waa hab jecyil ku jiro ee ilmahaaga wax loo baro. Waa qayb muhiim ee xiriirka adiga iyo ilmahaaga u dhexeeya oo barayaa carruurta inay iska adkaan karaan iyo inay yeeshaan dhaqan bulsho ee la aqbali karo.

Ciqaabta waxaa ka mid ciqaab jir dil ah ee ma aha edbin. Ciqaab waxa loo isticmaalaa xakamaynta, awood iyo xanuun jirka si carruurta loogu qasbo inay dhaqankood beddelaan. Waa hab an waxtar lahayn waxbaridda carruurta ee noqon kara mid waxyeello u geysanaya ilmahaaga dareenkooda iyo suubanaanta dareenkooda. Hawsha aan qabano waxay noo muujisey

dheeraad....

(....sii-socda)



# Edbinta Hagaagsan

carruur badan oo markii ay yaraayeen la ciqaabi jirey inay marka ay koraan noqonayaan kuwo iyana markooda carruurtooda iyo qoyskooda waxyeeleya. Ciqaabta jir dilka ah ee dhallaanka ayaa sidoo kale ah wax aan la aqbali karin.

Dhallaanka si qalafsan loo qabto- ama ahaato si xanaaq ah ama lala ciyaarayo-aad ayey khatar u tahay. Luliddu waxay keeni kartaa dhaawac halis ah, oo ay ka mid tahay maskaxda oo wax ka gaaraan, indho beel iyo xataa dhimasho.

Dhaawac jirka ee ay sabab u yihiin waalidka ama daryeelaha ilmaha waxaa loo qaadanayaa waxyeeleyn dhinaca sharciga ee Ilmaha iyo Qoyska ee Ontario taas oo u baahnaan doonta in Children's Aid Society ay baaritaan ku sameeyaan.

## **Maxay tahay waxyeleynta Jirka?**

Waxyeleynta jirka waa si ula kac ah isticmaalka xog ama talaabo (inta badan ay sameeyaan waalidka ama qof ilmaha daryeela) sababi kara ama keena dhaawac ilmaha. Waxa ka mid noqon kara feerid, dhirbaaxey, garaacid, lulid, gubid,

qaniinid ama tuuris ilmaha. shaqada an hayno waxaan si joogta u aragnaa xalaado ciqaab jirka ah ee faraha ka baxday. Ciqaabta jirku waxay si fudud u horseedi kartaa waxyeeleyn jirka marka waalidka ama daryeelayaasha ilmuhu ay dhumiyaan isxakameyntooda markaasna si caro ah ilmahooda wax ugu dhuftaan. Haddii aad tahay inta qof iska xanaaq dhow ama isku buuqa dhaqanka ilmahaaga darteed, barashada siyaabo kala duwan ee gacan ku haynta xaaladda ayaa kaa caawin kara adiga iyo ilmahaaga.

## **Caawinaad ayaa jirta**

Qof markasta quman ma jiro. Haddii aad u baahan tahay caawinaad, codso. Macluumaad lacag la'an ah oo asturan oo la xiriira waalidnimada iyo adeegyada bulshadaada ayaad ka heli kartaa Children's Aid Society of Toronto adiga waca **416-924-4646**.